



Taariikh: 01/04/2020

War-Saxaafadeed

Cabasho nooga timid Shirkaddaha Barhel ee shamintada iyo Dhul iyo Guri

Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed waxey u taagan tahay soo dhicinta xuquuqaha sharikaadka gaarka loo leyahay iyo taageerida Dowlada. Waxaan u taagan nahay ka qeyb qaadashada siyaasadaha u daneynaaya sharikaadka gaarka loo leeyahay inaan ka dhaadhicino Dowlada, sidoo kalena fahamsiino sharikadaha ahmiyada siyaasada dowlada.

1-Waxaan manta oo ay taariikhdu tahay 1^{da} bisha Afaraad 2020 dooneynaa inaan ummada iyo dowlada Soomaaliyeedba ku wargelineyno mowqifka Rugtu ka taagan tahay baaqa wasiirka cadaalada ee JFS uu ku garab istaagay taliyaha ciidanka asluubta ee la xariira arimaha shirkada dhul iyo guri iyo warshada sibirka (Barhel):

Taariikhdu marka ay aheyed 05.02.2013 Khilaaf derisnimo dhuleed oo udhaxeeyay Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed iyo Shirkadda Dhul iyo Guri, ayaa waxaa ka dhashay hishis uu horjooge ka ahaa Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed; kadib markii loo saarey gudi farsamo ee ka socdey dhinaca Ciidanka Asluubta ay soo xaqiijiyeen inaysan shirkada Dhul iyo Guri aysan ka dageneyn dhul balse ciidanku ay dalbanayaan iney kudurkaan 255m; meshaashaas waxaa kasoo baxay isafgarad, dajiyay xaaladi darisnimo wanaaga, islamarkaana ay si wadajir ah u wada saxiixeen qoraal ay heshiis ku yihiin labada dhinac.

Taliyuhu waxuu si rasmi ah ula xariiray Wasiirka Cadaladda ee xiligaas Dr Abyan, sida ku cad lifaaqa qoraalkan, kuna wargeliyey go'aangii gudigii saraakiisha ee farsamo in la meel mariyo.

Intaas kadib, Xafiiska Wasiirka Wasaradda Garsoorka iyo Arimaha Diinta, Dastuurka, Dibuheshiisiinta iyo Federaalka waxaa kasoo baxay warqad summadeedu tahay: WGADDDHF/XW(2-12/35) 2013; kuna taariikhsan 11/02/2013; ujeedkeeduna ahayed **fulin heshiis sugid xuduudo dhul dhex marey Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed iyo shirkadda Dhul iyo Guri- Liibaan**- sidaasaa shirkadu uga durugtay masaafadii lagu heshiiyey (255m) isbitaalka Keysaney.

2- Shirkadda Barhel oo leh warshada Sibirka, waxey dhulka ay degen tahay ka kireysatey Bankiga dhexe . Waxeyna ka dhistey warshad casri ah kuna sameeysey maalgelin xoogan, waxeyna shaqo u abuurtey dhalinyaro Soomaaliyeed oo waxbaratey.

Shirkadan Barhal waxey mudan tahay in lagu abaal mariyo maagelinta ay dalka ku sameeysey, hordhacna u tahay maalgaliyaasha isgaashiga shisheeye iyo wadaniyiinta waxaana ayaan darra ah in taliyaha ciidanka asluubta si aflagaado ah oon ka fiirsi lahey uu ugu gafay shirkadan.

Hadaba Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha soomaaliyeed waxay soo jeedineysaa qodobadan:

1. Waxaan cambaareyneynaa hadalkii kasoo baxay Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed ee dhaawacayey labada shirkadood ee Dhul iyo Guri iyo Barhal,
2. Waxaan aad uga xun nahay warqada ka soo baxdey xafiiska wasiirka Cadaalada ee JFS ay sumadeedu tahay WC&AG/XW55203/2020, kuna taariikheysan 30/3/2020; taageereyseyna dhaawici taliyaha ciidanka asluubta u geystey una ekeyd mu'aamarad lagu hagar daameynaayey shirkadahaas.
3. Waxaan aaminsannahay haddii la raaci lahaa fariintii Ra'iisul wasaaraha oo aheyd inaan warbaahinya lagu wada hadlin, aysan shirkadahaasi dhaawaca gaarey uusan gaari laheyn, oo wadahadal iyo habraac sharciyeed wax lagu xallin kari lahaa,
4. Arrimaha noocan ah waxey ka hor imaan karaan ama ay dhaawici karaan Maalgashiga iyo horumarinta Warshadaha yar-yar oo duruuriga ah iyo soo noleeynta Dalxiiska iyo bilicda guriyeenta ee kobcin doonta dhaqaalaha Dalka iyo soo xareeynta Canshuuro fara badan
5. Waxaan ka codsaneynaa Gudoomiyaha Gobolka Banaadir ahna Duqa magaalada Muqdisho iyo Waziirka Wasaarada Ganacsiga JFS iney dhiiri geliyaan Maalgashiga Dalka, difaacaanna Ganacsatada Soomaaliyaad oo hiil iyo hooba u hurey Dadkooda iyo Dalkooda hooyo,

ugu dambeyntii, waxaan rajeyneynaa in falalka noocan oo kale inuusan soo laabanin.

Mahadsanidiin